

Salaan,

Waxaan kuula soo xiriireynaa si aan kuu ogeysiino in laga bilaabo 1da Luulyo 2018 waxaad arki doontaa isbeddelo sida qaabka adeegyada dhallinyarada looga bixiyo the City of Melbourne.

The City of Melbourne hadda waxay leedahay saddex bixiyeyaasha adeegyada dhallinyarada:

- **the drum youth service** (qayb ka mid ah ah **drummond street**), oo lagu maalgaliyo si ay uga bixiso adeegyada dhallinyarada Carlton iyo Parkville.
- Cohealth (horay u ahayd Doutta Galla), oo lagu maalgaliyo si ay uga bixiso adeegyada dhalinyarada ee North Melbourne iyo Kensington
- Front Yard (qayb ka mid ah Melbourne City Mission), oo lagu maalgaliyo si ay uga bixiso adeegyada dhalinyarada ee Central Business District (CBD)

Sannadkii hore, the City of Melbourne waxay dib u eegtay qaabkii adeegyada dhalinyarada loo qabtay. Taas ayadoo la raacayo, the City of Melbourne waxay bedeshay qandaraaska lagu bixiyo adeegyadan, taasoo macnaheedu yahay in hal haya'd lagu maalgelin doono bixinta Adeegyada Dhalinyarada ee the City of Melbourne laga bilaabo 1da Luulyo, 2018. Bixiyahani wuxuu adeegyada ka bixinayaa degmooyinka oo dhan, oo ay ku jiraan Carlton, Parkville, North Melbourne, Kensington & CBD. Isbeddeladan waxaa ka faa'iideysan doona dhalinyarada iyada oo u oggolaanaysa inay helaan meelo badan oo ku haboon barnaamijyada iyo adeegyada, iyo sidoo kale buuxinta daldaloolada adeegyada muhiimka ah ee degmada oo dhan.

The drum youth service wuxuu ku faraxsan yahay inuu ku dhawaaqo in aanu nahay adeeg bixiyaha kaliya ee ku guuleysta si loo bixiyo adeegyadan dhalinyarada. Waxaan aaminsanahay in hindisaheena uu ku guuleystay sababtoo ah habka cusub ee loo adeegsaday oo loo wada dhan yahay kaasoo adeegsanaya wada-naqshadeynta. Qaabka wada-naqshadeynta ayaa ka tarjumaya sidaay nooga go'an tahay in dhalinyaradeenna ayadoo loo marayo shaqo ku habboon iyo hubinta in dhalinyaradu ay si toos ah talo ugu yeeshaan adeegyada iyo hawlaha. Waxaan rajeyneynaa inaan xoojino xiriirka aan laenahay bulshada iyo wax ka-qabashada baahiyaha dhalinyarada iyo bulshadooda.

Ayada oo drum ay noqotay bixiyaha keliya ee Adeegga dhalinyarada the City of Melbourne, taaas waxay macnaheedu tahay isbeddelada qaarkood ee dhalinyarada, qoysaskooda iyo bulshadooda. Isbeddelka ugu wayni wuxuu noqon doonaa in drum bilaabi doonto inay barnaamijyo ka bixiso

North Melbourne, Kensington iyo CBD. Waxaan sii wadi doonaa inaan ka shaqeyno Carlton iyo Parkville.

Waxaan jeclaan lahaa inaan qirno shaqada muhiimka ah ee isdhexgalka 15kii sano ee la soo dhaafay iyo xiriirka ay ka sameeyeen bulshada dhexdeeda waqtigan. Waxaan si dhow ula shaqeyn doonaa the City of Melbourne iyo cohealth si aanu kala-guurka uga dhigno mid u fudud bulshada.

Waxaan ognahay in isbeddelku noqon karo mid dareenkiisa leh, sidaa darteed waxaan dooneynaa inaan dhallinyarada, qoysaska iyo dadka kale ee daneynaya ogaadaan inaan damacsanahay isbedelo kooban barnaamijyadeena Carlton. North Melbourne iyo Kensington waxaan sidoo kale si adag uga shaqeyneynaa si aanu hubinno inaan sii wadi karno inaan bixino barnaamijyo iyo adeegyo muhiim ah oo ay Cohealth waddey. Waxaan sidoo kale xafiis ka furaneynaa Community Centre ee North Melbourne ee Bunclere Street, halkaas oo ay ku taaley cohealth.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan isbedelada barnaamijyada ayaa laga heli doonaa website-ka internetka ee Asbuuca soo socda (ka eeg halkan <http://thedrum.ds.org.au/>)

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan adeegyada, waxaad la xiriiri kartaa

Chantelle Higgs, Drummond street services & Stepfamilies Australia,

taleefanka: 03 9663 6733 Mob: 0488 559 007